Ma dooneeysa in aad qooyskaaga soo kafaalaqaadid oo ay Canada kugu yimadaan?

Waad soo kafaalaqaadi kartaa xubno qooyskaaga ka tirsan oo Canada dibeddeeda ku nool si ay halkaan u yimaadaan oo ugu noolaadaan si joogta ah haddii:

- aad tahay wadani Canadian ah ama aad haaysatid deganaansho joogta ah, iyo
- qof 18 sano jir ama ka weyn tahay.

Waa in aad dhiibtaa kharajka la iska rabo. Waxaana jira "heer dakhliga looga qiyaas-qaato" (income guidelines) oo shegaaya inta uu le'eg yahay dakhliga laga doonayo qofka wax kafaalaqaadaya. Waxaa kale oo laga rabaa in aad ka soo baxdid sharuudo kale oo aad dhamman buuxisid wararka uu dalabka kafaalaqaadku ku weeydiinayo. Waxaa suurtogal ah in hey'adaha dejinta qaarkood iyo kilinikayaasha sharciyeed ay kaa caawiyaan arrintaan.

Yaan kafaalaqaadi karaa?

Waxaad kafaalaqaadi kartaa qofka aad is qabtaan. Qofkaasi waa inuu yahay mid aad sharci ahaan isu qabtiin. Qofka aad is qabtiin waxuu noqon karaa ruux aad nin/naag isla tihiin ama aad nin iyo naag kala tihiin.

Inta badan, saaxiibkaa/saaxiibtaa waad kafaalaqaadi kartaa. Qofkaani waa mid aad la leedahay "xiriir u'eg mid isqabitaan" (marriage-like relationship). Taas waxaan ula jeedna labo qof oo u dhaqma sidii kuwo is qaba. Waxey ahaan karaan nin iyo nin, naag iyo naag, ama nin iyo naag. Waxaa jira siyaabo badan oo loo muujin karo in uu xiriirku is-qabid u'eg yahay. Doono la-talin sharci.

Waxaad kafaalaqaadi karta waalidiinta iyo awooweyaasha/ayeeyoyaasha.

Waxaad kafaalaqaadi kartaa ilmahaaga ka yar 22 sano haddii ayan qof is-qabin ama ayan isla nooleeyn.

Doono la-talin sharci ah haddii ilmahaagu ayan sharuudahaas ku sifoobin, ama haddii aad rabtid in aad kafaalaqaadid qof kale ama qof Canada jooga.

Waxaad doonataa oo kale la-talin sharciyeed haddii dakhliga ku soo gala uu san dhammeyn heerka qiyaas-dakhliyeedku u sheegayo in laga rabo. Inta badan, heerka qiyaas-dakhliyeedku laguuma dabaqo dadka is-qaba, jaalka, ama ilmaha.

Haddii aad is-qabtaan qof, jaal, ama aad ilmo leedahay wakhtiga aad qaadaneysid deganaansha joogtada ah, waa in aad la socodsiisa waxda socdaalka. Haddii aadan taas sameyn, hadhoow iyaga ma aad kafaalaqaadi kartid. Waxaa xitaa khatar geli kara xaaladaada joogitaneed ee Canada. Raadso la-talin sharci.

Maxaa dhacaya kadib markii dadkii aan kafaalaqaaday ay Canada yimaadaan?

Markay yimaadaan kadib, muddo sanado ah waxaad ku **khasbantahay** in aad iyaga masruuftid adigoo hubinaya in ay haaystaan waxyaabaha ay ka mid yihiin hooy, dhar, iyo cunto, ama lacag ay ku iibsadaan waxyaabahaas.

Kafaaleqaade ahaan, waa in aad masruuftaa muddo 3 sano ah qofka aad si qabtiin ama isla dhaqantin. Muddada Ilmahu waxey ahaan kartaa 10 sano ama in ka yar. Qooyskaaga intooda kale, muddadu waa 10 sano. Intaas kadib, waxaa dhici karta in masruufidooda weli ay mas'uuliydi ka sii saarnaato sida uu qabo Sharciga Qooyska ee Canada (Canadian family law).

Maxaa dhacaya haddii aanan masruufin dadka aan soo kafaalaqaaday?

Waxey codsan karaan lacagta dadka caayrta ah la siiyo "Ontario Works" ama gunnada la siiyo dadka kartidoodu dhimman tahay "Ontario disability benefits". Haddii lacagtaas la siiyo iyadoo weli lagu dhexjiro muddadii ay ahayd in aad kafaaleqaade ahaan u masruufto, dowladdu lacagtaas adiga ayeey dib kaaga qaadan kartaa. Laguumana oggolaanayo in aad qof kale mustaqbilka kafaalaqaadid ilaa iyo intaad lacagtaas oo dhan ka soo celineysid.

➥bogga 2aad warar kale ayaa ku qoran➥

Maxaa la sameeyaa haddii codsiga la diido?

Go'aan ka laguugu diidayo codsiga waxaa laguugu soo diri doona qoraal ahaan. Isla markaas raadso la-talin sharciyeed. Waxaad rafcaan u qaadan kartaa Guddoonka Socdaalka iyo Qaxootiga (Immigration and Refugee Board). Waxaad haysataa muddo 30 cisho ah oo aad rafcaankaaga ku diri kartid laga bilaabo taariiqda aad heshid go'aanka qoraalka ah.

Waxaa jiri kara siyaabo kale oo uu qooyskaagu ku soo socdaali karo. Boggaan waxaan kuugu sheegeyna warar guud oo keliya. Waa in aad heshaa la-talin sharciyeed oo xaaladaada ku saabsan.

Sida kaalmo loo helo

Findhelp waa hey'ad beeleed oo dadka ku caawisa luqado badan. Waxey teleefoonka ka jawaabaan afar iyo labaatanka saac (24-ka saac), toddobada beri ee asbuuc walba.

Waxey kuu sheegi karaan:

- meesha aad cawinaad sharci ka heli kartid, iyo
- sida aad ula xiriiri kartid hey'ad dejineed ama hey'ad beeleed oo aad ka heli kartid caawinaad noocyo kale ah.

Findhelp kala xiriir:

☎ Lacag la'aan ah
(Toll-free) **1-866-667-5366**

☎ Lacag la'aan ah ee dadka maqalka ka dhibaateeysan
(Toll-free TTY) **1-888-340-1001**

💻 **www.211ontario.ca**

Caawinaado kale:

Waxaa soo diyaariyey CLEO (Community Legal Education Ontario/Éducation juridique communautaire Ontario) iyagoo ay kala shaqeyeen CLEO Six Languages Advisory Group, oo ka kooban 10 hey'adood oo xubin ka ah.
Mashruucaan waxaa maalgaliyey Ontario Trillium Foundation iyo Legal Aid Ontario.
CLEO waxey Findhelp uga mahad celinaaysa caawinaada teleefoonka oo ay mushruucaan ka geeysteen.
Booqo **www.cleo.on.ca** si aad bogogaan iyo warar kale ugula soo baxdid.